Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

SIYAASADDA SHEEGIDDA WIXII KHALDAN

Agoosto 2015

NOOCA1.1

KOONTAROOLKA NOOCA

NOOCA	LASOO SAARAY	MUALIF	WAXAA LIN LA SHAACIYO AMRAY
1	AGOOSTO 15	G WINTER	I GORDON
1.1	JUUN 19	G WINTER	I Gordon
1.2	Diseembar 20	R Bolger	G Winter

TUSMO

TUSMO 1
SIYAASADDA SHEEGIDDA WIXII KHALDAN 2
1. Baaxadda **2**
2. Sharciga Dahabiga ah **2**
3. Qeexitaan **3**
4. Shaqaalaha ka mas'uulka ah hirgalinta siyaasaddaan **3**
5. Yaa siyaasaddaan ay waxtartaa? **3**
6. Noocyada shaacinta ee kujira waa kuwama? **3**
7. Goorma ayay tahay inaad shaacin samayso? **4**
7.2. Xeerka Sharafta ee IDG 6
7.3. Is'haysiga CAALAMIGA AH EE QM 7
8. Sideen shaacin u sameeyaa? **8**
8.1. Qofka u horreeya ee lala xiriirayo 8
8.2. Qofka labaad ee lala xiriirayo 8
8.3. Hay'adaha Dibbadda ah 8
9. Sidee ayay tahay inaan shaacin u sameeyo? **9**
9.1. Shaacin aan qof la magac dhabeyn 9
10. Baaritaan shaacin ah **9**
11. Qarsoodi **10**
12. Badbaadinta iyo taageerada loogu tala galay dadka sheega wixii khaldan **11**
13. Tillaabo wax saxid ah iyo u hoggaansamid **11**
14. Kormeeridda iyo dib u eegidda siyaasaddaan **11**

SIYAASADDA SHEEGIDDA WIXII KHALDAN

1. Baaxadda

Taladaan soo socota waxay dejinaysaa habraaca shakhsiyaadku ay ku soo tebin karaan walaacyada ku saabsan habdhaqannada goobta shaqada ee **khtarta ah**, **geyru sharciga** ah ee aan **anshaxa ahayn.**

Looguma tala galin inay bixiso hannaan maareyn oo gaarsiisan heer la wada qaato waana inaan loo tixgalin sidii hab lagu liidayo silsiladda taliska ee caadiga ah. Siyaasaddaan way ka gaddisan tahay **Habraaca Cabashada** ee Shirkadda ee loogu tala galay cabashada caynkaan ah.

IDG waxay soo dhaweyneysaa tilmaamidda iyo la tacaamulka xiga ee dhammaan xadgudubyada habdhaqannada goobta shaqada ee khatarta ah, ah geyru sharci ama anshax darro. Siyaasaddaan waxaa loo dejiyay in lagu dhiirrigaliyo heerarka ugu sarreeya ee habdhaqanka shakhsiga iyo shirkadaha waxaana loogu tala galay in lagu badbaadiyo shaqaalaha sheega wixii khaldan ee ah habdhaqan xun oo ka imaanaya in qof loo geysto wax xun ama shaqada taa darteed looga saaro si aan xaq ahayn.

IDG waxaa gebi ahaan ka go'an daacadnimada iyo heerarka ugu sarreeya ee habdhaqanka anshaxa.

2. Sharciga Dahabiga ah:

Waxaan qiimeynaa wixii walaacyo ah oo loo soo tebiyo si niyad sami ah taasi oo soo hoos galaysa habraacaan. Haddii aadan hubin in arrimaha ku walaac galinaya ay ku jiraan baaxadda waxyaabaha ay wax ka qaban karto siyaasaddaan (tusaale ahaan, haddii aad ka shakisan tahay balse aadan hubin in sharciga la jabiyay, ama in qofi u dhaqmayo si ka baxsan baaxadda awooddiisa), waxaan kugu boorrineynaa inaad walaacyada aad qabto durba soo tebiso adoo isticmaalaya habraacyada ku xusan siyaasaddaan.

Sharciga Dahabiga ah wuxuu dhigayaa:

Haddii aad ka shakiso – soo sheeg

3. Qeexitaan

Sheegidda wixii khaldan waa shaacinta xogta qof shaqaale ah oo la xiriirta waxoogaa khatar, xatooyo ama habdhaqan geyru sharci ah ama aan anshax ahayn oo ka jira goobta shaqada.

4. Shaqaalaha ka mas'uulka ah hirgalinta siyaasaddaan

Guddiga ayaa leh mas'uuliyadda guud ee siyaasadda Shirkadda ee sheegidda wixii khaldan, laakiin waxaa uu door bidi karaa inuu u dhiibo mas'uuliyadda maalinlaha ah Sargaalka Igman [DO] taasi oo loogu tala galay dusha kala socoshada iyo hirgalinteeda.

Mas'uuliyadda kormeerka iyo dib u eegidda shaqada qorshaha iyo wixii talooyin ah oo loogu tala galay isbaddal ururka gudihiisa ah oo ka dhalanaya baaritaano lagu sameeyay cabashooyinka siyaasaddaan soo hoos galaya waxay saaran tahay Guddiga.

Maareeyeyaasha ayaa leh mas'uuliyadda gaarka ah ee lagu fududeynayo shaqada siyaasaddaan iyo xaqiijinta in shaqaaluhu daremaan inay awoodaan inay sheegaan walaacyo ayagoon ka cabsanayn aargoosi sida waafaqsan habraaca hoos lagu xusay. Si loo fududeeyo hannaankaan, maareeyeyaasha waxaa la siin doonaa tababar ku saabsan qaabka shaqo ee sharciga iyo hawlgalka ee munaasabka ah iyo habdhaqanka ugu wacan.

Dhammaan shaqaalaha ayaa mas'uul ka ah guuleysashada siyaasaddaan waana inay xaqiijiyaan inay qaadaan tillaabooyin lagu shaacinaayo wixii khalad ah ee lagu kaco ama dhaqan xumo ah ee ay ogaadaan. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid waxa ku xusan siyaasaddaan ama sida loo adeegsanayo, waa inaad la xiriirto DO adigoo ka codsanaya tababar ama xog dheeraad ah.

5. Yaa siyaasaddaan ay waxtartaa?

Siyaasaddaan waxay ku habboon tahay dhammaan shaqaalaha aanu shaqada siinay ee heer kasta iyo darajo kasta leh, haddii ay yihiin maareeyeyaal sarsare, agaasimeyaal, shaqaale caadi ah, lataliyeyaal, tababar kuwo qaadanaya, kuwo guryaha ka shaqeeya, shaqaale hay'adeed ama kuwo inay khibrad helaan darteed u shaqeeya (kuwaasi oo dhammaantood si guud loogu yaqaano shaqaale siyaasaddaan gudaheeda).

6. Noocyada shaacinta ee kujira waa kuwama?

Siyaasaddaan waxay si gaar ah uga timid oo looga soo qaatay Habraaca Cabashada ee Shirkadda. Haddii aad qabto cabasho la xiriirta daruufahaaga shakhsi ahaaneed ee goobta shaqada waa inaad adeegsato Habraaca Cabashada.

Walaacyada ku saabsan dhaqan xumi ururka dhexdiisa ah oo soo hoos galaysa qeybaha baragaraaf 7 oo saamaysa ama saamayn kartay, tusaale ahaan macaamiisha, isticmaaleyaasha adeegga, xubnaha dadweynaha ama shaqaale kale waa in lasoo sheego ayadoo la adeegsanayo habraaca ku cad baragaraafka 8.

7. Goorma ayay tahay inaad shaacin samayso?

Waa inaad isticmaashaa siyaasaddaan haddii aad qabto walaac dhab ah oo ku saabsan inay jiraan sababo macquul ah oo aad ku rumeysanayso:

1) dembi ayaa la galay, la galayaa, ama loo badinayaa in la galo; ama

2) qof ayaa ka baaqsaday, ka baaqsanaya, ama loo badinayaa inuu ka baaqsado inuu u hoggaansamo waajibaadkiisa sharciga waafaqsan; ama

3) dhicisoobid caddaaladeed ayaa dhacday, ayaa dhacaysa, ama loo badinayaa inay dhacdo; ama

4) Xaquuqul Insaanka shakhsi un ayaa halis la galiyay, halis la galinayaa, ama loo badinayaa in halis la galiyo: ama

5) caafimaadka iyo badbaadada shakhsi un ayaa halis la galiyay, halis la galinayaa, ama loo badinayaa in halis la galiyo; ama

6) deegaanka yaa dhaawac loo geystay, dhaawac loo geysanayaa ama loo badinayaa in dhaawac loo geysto; ama

7) wax ka mid ah waxyaabaha sare lagu soo xusay ayaa la qarinayaa si ula kac ah, ama loo badinayaa in si ula kac ah loo qariyo.

Xaaladda shaqada Shirkadda markii laga hadlaayo, walaacyada gaarka ah ee soo hoos gali kara sharuudaha siyaasaddaan waxaa ku jira, tusaale ahaan, jebinta xeerka Anshaxa, qarsoodiga, qodobka talo (aan badbaado lahayn), khatar ah ama dayac, xatooyo dhanka maaliyadda ah, dhibaateyn ku dhacaysa dad kale iyo caafimaadka iyo badbaadada. Guud ahaan, siyaasaddaan waxaa kujira tillaabooyin ama waxyaabo laga gaabiyay oo aad tixgaliso inay geyru sharci yihiin, si liddi ku ah siyaasadda ama habraaca la hirgaliyay ama ka baxsan baaxadda awoodda shakhsi, tillaabooyinka dhaawici kara sifaha wacan ee Shirkadda iyo dano iska hor imaanaya. Si kastaba ha ahaatee, shaacin qura oo khuseysa tillaabooyinkaas soo hoos galaya qeybaha baragaraafkaan (yacni baragaraafka 7) waxay u qalmi doontaa badbaadada sharci ahaaneed ee ku habboon.

IDG waxay bixisaa talo cad oo ku saabsan waxa loo aqoonsan yahay habdhaqan anshax ah, ayadoo mid kasta oo waxaas ku jira hoos si kooban loogu xusay. Saddex waxyaabood oo gaar ah oo talo ah ayaa la ogeysiinayaa shaqaalaha:

- amarka MD ee Anshaxa Shirkadda
- Sharciga Sharafta ee IDG
- Ishaysiga Caalamiga ah ee QM [yacni midnimada caalamiga ah]

Liisku ma dhammaystirna. Dhammaan sharciyada dalka gudihiisa ah iyo kuwa caalamiga ah oo uu ku jiro sharciga caalamiga ah ee Xaquuqul Insaanka ayaa ku taxaluqa mar walba.

7.1. Anshaxa Shirkadda

Dhammaan shaqaalaha waxaa la xasuusinayaa amarka MD ee Anshaxa Shirkadda:

Anshaxa Shirkadda

Anshaxa Shirkaddeena (ama *Kaida*) wuxuu ku salaysan yahay daacadnimo iyo hufnaan, kuwaasi oo sidoo kale ah Kaida uu leeyahay *Gurkha* dhab ah. Intaasi kadib, *Kaida* hadday tan tahay waxay awood siisaa sidii loo bixin lahaa xalalka ammaanka ee ugu tayo wanaagsan ee lagu daboolayo baahiyaha macmiilka ayadoo wali ay naga go'an tahay bixinta shaqo ammaan ah oo loogu tala galay shaqaalihii hore ee *Gurkha* ee xirfadeysnaa ee khibradda lahaa. Musuq iyo qaraabo kiil lama aqbali karo gabi ahaan iyo si cad. Ka shirkad ahaan, waxaan diidnaa inaan bixino ama qaadano laaluush noocii uu ahaadaba. Haddii aad musuq ku dhaqanto ama daacad darro lagaama soo dhaweyn doono Shirkaddaan oo markii la soo ogaado musuqaaga ama daacad darridaada, waxaan joojin doonaa adeegyadaada. Haddii aad xafiddo dhaqamada soo jireenka ah ee sharafta leh ee *Gurkha* dhab ah, waxaan rajeyneynaa inaan ku siino shaqo muddo dheer oo guul leh oo ah Shirkaddaan gudaheeda.

Waxaa naga go'an inaan taageerno Is'haysiga Caalamiga ah ee QM [yacni midnimada]

Shaqaalaha heer kasta leh waa inay ka wada hadlaan, fahmaan oo dabbaqaan mabaadiida soo socda ee Midnimada Caalamiga ah ee QM (UNGC) taasoo Maareynta dhammaan Shirkadaha IDG ay gebi ahaanba ka go'antahay. Waxaad muhiim u tahay ballanqaadkaan. Buugyarahaan waxaa ka buuxa tusaaleyaal ku saabsan sida annaga ka Koox ahaan aan ugu hoggaansano UNGC laga soo bilaabo meesha in laga saaro musuqa iyo takoorka ilaa badbaadinta xaquuqul insaanka, fursad loo siman yahay iyo mas'uuliyad in laiska saaro bii'ada. Waxaa lagugu boorrinayaa inaad barato oo dabbaqdo mabaadiidaan sida waafaqsan Siyaasadaha Kooxdeena.

Qore: Agaasimaha Maareynta [MD]

7.2. Xeerka Sharafta ee IDG

Dhammaan shaqaalaha waxaa la xasuusinayaa Xeerka Sharafta ee looga baahan yahay dhammaan shaqaalaha IDG.

Waxaan ballan qaadayaa inaan si **Sharaf** leh u dhaqmo inta aan gudanaayo dhammaan hawlaheyga iyo waajibaadkeyga maalinlaha ah.

Waxaan xaqiijin doonaa in habdhaqankeyga ay hagaan mabaadiida kala ah **hufnaan, daacad, xushmad, geesinimo, daacadnimo, naxariis iyo edeb.**



7.3. Is'haysiga CAALAMIGA AH EE QM

IDG waxay wax ka saxiixday Is'haysiga Caalamiga ah ee QM, yacni heshiiskii midnimada caalamiga ah. Waxaa uu ka kooban yahay heshiisku dhowr qodob oo haga dabeecaddeena shakhsiyeed iyo dabeecaddeena ka shirkad ahaaneed. Dhammaan shaqaalaha waxaa la xasuusiyaa mabaadiida UNGP:

XAQUUQUL INSAANKA	
Mabda'a 1:	Ganacsiyadu waa inay taageeraan oo qaddariyaan badbaadinta xaquuqul insaanka caalamka oo dhan lagaga dhawaaqay
Mabda'a 2:	Xaqiiji inaadan ku adkeynsan xadgudubyada ka dhanka ah xaquuqul insaanka
SHAQADA	
Mabda'a 3:	Ganacsiyadu waa inay sare u qaadaan xorriyadda in ururkii sharci ah lagu biiri karo iyo aqoonsiga wax ku oolka ah ee xaqa loo leeyahay in si wadajir ah gorgortan loo galo
Mabda'a 4:	In meesha laga saaro dhammaan qaababka shaqada qasabka ah
Mabda'a 5:	Mamnuucidda wax ku oolka ah ee ku shaqeysashada carruurta
Mabda'a 6:	In meesha laga saaro takoorka dhanka shaqaaleysiinta iyo shaqada ah
DEEGAANKA	
Mabda'a 7:	Ganacsiyadu waa inay taageeraan qaab taxaddar oo ka dhan ah caqabadaha deegaanka
Mabda'a 8:	Samee dadaallo sare loogu qaadayo mas'uuliyad deegaan oo intii hore ka weyn
Mabda'a 9:	Dhiirigali horumarinta iyo baahinta teknoolojiyado bii'ada u roon
KA HORTAGGA MUSUQA	
Mabda'a 10:	Ganacsiyadu waa inay ka hortagaan musuqa nooc kasta oo uu yahay, sida baad iyo laaluush

8. Sideen shaacin u sameeyaa?

8.1. Qofka u horreeya ee lala xiriirayo

Waxaan garanaa in laga yaabo in mar walba aadan dareemin raaxo markii lagala hadlayo walaacyo maareeyahaaga kuu gaarka ah. Habraacaan dartii, waxaa lagaa dalbayaa marka hore inaad walaacyada u sheegto ku saabsan wixii dhaqan xun ah oo soo hoos galaya qeybahaan ku cad baragaraafka 6 DO kaasi oo haatan ah Agaasimaha, xafiiska Bariga Dhexe, Nick Alister-Jones.

DO wuxuu toos u hoos yimaadaa Guddiga Agaasimeyaasha ee ka shaqeeya arrimaha la xiriira siyaasaddaan. Markii uu maqan yahay DO ama Xoghayaha Shirkaddu, Madaxa Fulinta ayaa laga yaabaa inuu soo magacaabo sargaal kale oo fuliya waajibaadka DO ee siyaasaddaan soo hoos galaya.

8.2. Qofka labaad ee lala xiriirayo

Haddii shaacintu ay aad u daran tahay, ama ay si un ugu lug leedahay DO, waa inaad toos ugu gudbiso Agaasimaha Maareynta, ama Guddoomiyaha Guddiga Agaasimeyaasha.

Waxaan mar walba ku dadaali doonaa inaad durba wax ka qabano cabashada anagoo wax uga qabanayna si xaq ah, laakiin haddii aad wax u shaacisay si waafaqsan habraaca lagu sharxay Siyaasaddaan gudaheeda oo aad u sheegtay DO balse aadan ku qancin baaritaanka ama sidii loo soo gabagabeeyay, waa inaad toos warqad ugu qorto Agaasimaha Maareynta ama Guddoomiyaha Guddiga Agaasimeyaasha.

8.3. Hay'adaha Dibbadda ah

Ujeedada siyaasaddaan waa in la bixiyo qaab gudaha ah oo loogu tala galay soo tebinta, baaritaanka iyo buskeynta wixii khalad ah oo ka dhacay goobta shaqada oo in la sheego ay habboon tahay. IDG waxaa si buuxda uga go'an heerarka ugu sarreeya ee anshaxa iyo habdhaqanka sharci waxayna la shaqeyneysaa wixii hay'ad ah oo dibbadda ka ah shirkadda si wax looga qabto wixii dhacdooyin ah. Waxaa marka la rajeynayaa inaysan muhiim ahaan doonin in shaqaaluhu uu digtoonaan galiyo ururo dibadda ka ah shirkadda.

Si kastaba ha ahaatee, markii lagu jiro daruufo aad xasaasi u ah, ama kadib markii la gudbiyo warbixin gudaha ah taasi oo aan wax ka tarin sababta, waxaan garowsan nahay in ay habboonaan karto inaad walaacyada aad qabto u gudbiso urur dibadda ka ah shirkadda sida nidaamiye sharci. Haddii uu kugu jiro rabitaan ah inaad u gudbiso dhacdo urur dibadda ka ah shirkadda, waxaad sidaa yeeli kartaa haddii aad booqato https://icoca.ch/registering-a-complaint. IDG waa xubin ka tirsan ICoCA cabashooyinkana waxaa soo gudbin kara qofkii doona kaasi oo dhib loo geystay ama haya sabab uu ku rumeysto in xadgudub ka dhan ah Xeerka uu dhacay ama dhici rabo.

9. Sidee ayay tahay inaan shaacin u sameeyo?

Waxaad afka uga sheegi kartaa walaacyada aad qabto DO, ama qoraal ayaad u soo diri kartaa ama email adoo ku soo hagaajinaya:

comments@idg-security.com

Waa inaad caddeyso inaad isticmaaleyso Siyaasadda Sheegidda Wixii Khaldan aadna qeexdo in aad dooneyso in aqoonsigaaga qarsoodi laga dhigo iyo in kale. DO wuxuu kaa dalbi doonaa inaad walaacyadaada aad rasmi ka dhigto si qoraal ah ka hor ama kadib kulanka hore. DO ayaa ka maqsuudi doona inuu helay shaacintaadii rasmiga ahayd ee qoraalka ahayd wuxuuna sheegi doonaa tillaabada intaasi sii dheer ee la qaaday.

Waxaad xaq u leedahay inuu kusoo raaco oo kulanka DO aad leedihiin uu kula yimaado qof aad wada shaqeysaan (ama, hadii uusan joogin DO, shakhsi matalaya DO kaasoo caadiyan ah Xoghayaha Shirkadda) ee habraacaan soo hoos galaya. Qofka kula imaanaya waxaa laga dalbi doona inuu xushmeeyo qarsoodiga shaacintaada aad wax soo quftay iyo wixii baaritaan ah ee xiga.

9.1. Shaacin aan qof la magac dhabeyn

Waxaan garowsannahay in wixii la shaaciyo ee loo shaaciyo si soo hoos galaysa siyaasaddaan ay ku lug lahaan karaan arrimo qarsoodi ah oo aad xasaasi u ah waxaana laga yaabaa inaad door biddo inaad samayso shaacin ayadoon lagu magac dhabin. Shaacin ayadoon lagu magac dhabayn waxaa la samayn karaa oo lagu soo diri karaa cinwaanka emailka shaacinta, ama qoraal ayaa loogu soo gudbin karaa DO. Dhammaan eedeymaha baaritaan ayaa lagu samayn doonaa haddii daruufuhu saamaxaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ka shallaynaynaa inaanaan dammaanad qaadi karin inaanaan usoo baari karin si buuxda eedeymo ayadoon wax la magac dhabeyn maadaama baaritaan habboon aysan macquul ahayn haddii baaruhu uusan heli karin xog dheeraad ah, faahfaahin ama xaqiijinta xaqiiqooyinka. Waxaa muhiim u ah natiijo guul leh oo ka soo baxda habraaca in DO uu awood u leeyahay inuu helo xog dheeraad ah oo adiga kaa socota, inaad jawaabcelin bixiso, ama aad xaqiijiso bal in shaacintaada loo sameeyay si niyad sami ah. Sidaa darteed, waxaa la door bidayaa in dadka sheegaya wixii khaldan ay shaaciyaan aqoonsigooda una sheegaan DO iyo tillaabooyinka la qaadi karo si loo dhowro qarsoodi ahaanta hadii ay habboon tahay (eeg baragaraafka 11 ee ku saabsan qarsoodiga).

10. Baaritaan shaacin ah

IDG waxaa ka go'an inay baaritaan ku samayso waxyaabaha la shaciiyay ee daaha laga qaaday si buuxda, xaq ah, degdeg ah oo qarsoodi ah markii daruufuhu ay saamaxayaan. Kadib markii aad soo gudbiso wixii aad soo gudbisay ee ah shaacin rasmi ah oo qoraal ah, DO (ama shakhsi kale oo matalaya) wuxuu ka maqsuudi doonaa oo xaqiijin doonaa shan maalin gudahood oo ah maalmaha shaqada wuxuuna samayn doonaa qabanqaabo munaasab ah oo loogu tala galay baaritaan.

Dheerarka iyo baaxadda baaritaanka waxay ku xirnaan doonaan mawduuca uu ku saabsan yahay wixii la shaaciyay ee la facshiray. Badanaa, DO wuxuu samayn doonaa qiimeyn hore oo loogu tala galay wixii la shaaciyay ee la facshiray si go'aan looga gaaro bal in ay jiraan sababo loogu tala galay baaritaan intii hore ka sii faahfaahin badan inuu dhaco ama in shaacintaa ay tusaale ahaan ku salaysan tahay xog weyn. Dhacdo tii ay ahaataba, warbixin ayaa la soo saari doonaa oo nuqullo ayaa la siin doonaa Guddiga oo haddii ay munaasab tahay, adna nuqul ayaad heli doontaa. Haddii aadan ku qancin baaritaanka ama gabagabadiisa marka waa inaad tixraacdo baragaraafka 8.2.

Haddii la go'aansado in lagama maarmaan uu yahay baaritaan intaasi ka dheer, waxaan caadiyan soo magacaabi doonaa baare ama koox baaritaan oo ay ku jiraan shaqaale leh khibradda habraacyada goobta shaqada ee shaqeynaya ama khabiir aqoon u leh maadada la shaacinayo. Tusaale, haddii shaacintu ku saabsan tahay dhaqan xumi maaliyadeed, Madaxa Xisaabinta ee Gudaha ama Agaasimaha Maaliyadda ayaa laga codsan karaa inuu baaro. Shaqaale gaar ah ayaa laga dalbi doonaa inuu xukun kasoo saaro warbixinta uu soo gudbiyay baaruhu (ama kooxda baaritaanku). Talobixin loogu tala galay isbaddalkaan ayaa sidoo kale la soo dhaweynayaa inay ka timaaddo kooxda baaritaanka si ay awood noogu siiso sidii loo yareyn lahaa halista inuu dib u dhaco mar kale wax dhaqan xumi ah ama aan munaasab ahayn oo daboolka laga qaaday. Guddigu intaasi kadib wuxuu mas'uul ka ahaan doonaa dib u eegidda iyo hirgalinta talo bixintaas.

Ilaa hadda sida uu go'aansado DO inay habboon tahay lana adeegsan karo, waxaa had iyo jeer lagugu soo wargalin doonaa horumarka laga sameeyo dhanka baaritaanka. Si kastaba ha ahaatee, baahida loo qabo qarsoodi in wax laga dhigo waxaa laga yaabaa inay naga hor istaagto inaan ku siino faahfaahin gaar ah oo ku saabsan baaritaanka ama tillaabooyinka la qaaday. Caadiyan ma habboona in waqti cayiman loo qabto soo gabagabaynta baaritaannada marka horeba, maadaama kala duwanaanshiyaha dabiiciga ah ee waxyaabaha la shaacinayo ee laga fakarayo ay arrintan ka dhigto mid aan shaqeyneyn. Si kastaba ha ahaatee, anagu waxaa diirradda saareynaa inaan ula tacaamulno si muddeysan oo waqti cayiman leh dhammaan waxyaabaha la shaacinayo ee la soo facshirayo annagoo dhawreyna xaquuqda dhammaan shakhsiyaadka ku lugta leh.

Waxaa garawsannaa in ay jiraan arrimo aan gudaha shirkadda lala tacaamuli karin taasoo hay'adaha ka baxsan shirkadda ay u baahan doonaan in la ogeysiiyo laguna lug lahaysiiyo inta baaritaanku socdo ama baaritaanka kadib. Waxaanu ku dadaali doonaa inaan kugu soo wargalinno hadii arrinta loo gudbinaayo amaba loo gudbiyay hay'ad ka baxsan shirkadda, inkastoo laga yaabo inaan u baahano inaan samayno gudbinta caynkaasi ah adiga oo aan ogaan ama aan ogolaansho noo siin haddii aanu u aragno inay sidaasi habboontahay.

11. Qarsoodi

Dadaal walba waa in la sameeyo si qarsoodi looga dhigo aqoonsiga qofka wax shaaciyay ama daboolka ka qaaday asagoo adeegsanaya siyaasaddaan, ugu yaraan ilaa inta uu socdo baaritaan rasmi ah. Si aan loo curyaamin baaritaanka lagu samaynayo dhaqanka xun ee laga soo dacwooday, waxaa sidoo kale

lagaa filayaa inaad xaqiiqda aad walaaca ka sheegatay, nooca cabashada iyo aqoonsiga dadka ku lug leh aad ka dhigto qarsoodi. Laakiin waxaa laga yaabaa inay jiraan daruufo ay lagama maarmaan noqonayso inaad shaaciso aqoonsigaaga taasina waxaa u sabab ah nooca baaritaanka ama waxa daboolka laga qaadayo. Tani waxay u dhacdaa si xiriir la leh aadaabta la xiriirta ama baaritaanka sharci ama dacwadaha. Haddii ay kuula muuqato in daruufaha caynkaasi ah ay jiraan, waxaan ku dadaali doonaa inaan kuu sheegno in aqoonsigaaga loo badinaayo in daaha laga qaado. Haddii ay lagama maarmaan tahay inaad ka qeyb qaadato baaritaan, maadaama ay jirto inaad markii hore wax daaha ka qaaday, ilaa inta caqli gal ah waa la qarinayaa oo dhammaan tillaabooyinka caqligalka ah ayaa la qaadi doonaa si lagaaga badbaadiyo wixii dhibaateyn ah ama xun wixii aad daaha ka qaaday aawadood. Laakiin waxaa si kastaba ha ahaatee loo badinayaa in dawrkaaga maadaama aad tahay qof sheegaya wixii khaldan taasi daahir u noqoto oo ay fahmaan darafyo saddexaad inta baaritaanku uu socdo.

12. Badbaadinta iyo taageerada loogu tala galay dadka sheega wixii khaldan

Xubintii shaqaalaha ka tirsan ee walaacyo si dhab ah ay u qabto si niyad sami ah u sheegta ayadoo adeegsanaysa habraacaan la iskama indha tiri doono ama looma geysan doono waxyeello xun tillaabadaasi ay qaaday darteed.

Waxyeello xun waxaa ku jira tillaabo edbin ah oo aan laga baaraan dagin ama dhibaateyn. Haddii aad aaminsan tahay in wayeello xun lagugula kacayo taasoo ah goobta shaqada inaad si habraacaan waafaqsan u sheegtay walaac darteed, waa inaad arrinka ku soo wargaliso DO. Shaqaalihii dhibaateeya ama ka aargoosta kuwa walaacyada usoo tebiyay si siyaasaddaan waafaqsan waxaa laga qaadi doonaa tillaabo edbin ah.

Haddii baaritaan soo hoos galaya habraacaan uu ku soo gabagaboobo in wax daboolka laga qaaday dabool ka qaadidiisa loo sameeyay si xaasidnimo ah, walaahow abuurid si ah, aan niyad sami lahayn ama lagu doonayo faaiido shakhsi, qofka waxaas soo sheegay asaga qudhiisa ayaa tillaabo edbin ah laga qaadayaa. Kuwa doonaya inay wax daboolka ka qaadaan ayagoon raaceyn habraacaan ama wax daboolka ka qaadaya ayagoon magacooda sheegeyn waxaa laga yaabaa inaysan helin badbaadada ku cad siyaasaddaan.

13. Tillaabo wax saxid ah iyo u hoggaansamid

Maadaama ay yihiin qeyb ka tirsan baaritaankan lagu samaynaayo waxyaabaha daaha laga qaaday ee daaha looga qaaday si waafaqsan siyaasaddaan, tala bixinnada loogu tala galay isbaddalka waxaa laga qaadanayaa oo laga dalbayaa kooxda baaritaanka si awood loogu siiyo IDG inay dhinto halista inuu mar kale dhaco dhaqan xun ama wax aanan habbooneyn oo daboolka laga qaaday.Guddiga ayaa mas'uul ka ahaan doona dib u eegidda iyo hirgalinta talobixinadaasi mustaqbalka iyo soo tebinta wixii isbaddalo ah ee loo baahan yahay.

14. Kormeeridda iyo dib u eegidda siyaasaddaan

Siyaasaddaan waxay milicsanaysaa habdhaqanka IDG ee Agoosto 2015.

DO iyo Guddiga ayaa mas'uul ka ahaan doona dib u eegidda siyaasaddaan marka laga hadlaayo dhanka sharciga iyo dhanka shaqo ugu yaraan sannadkiiba mar.

DO waxaa saaran mas'uuliyadda lagu xaqiijinaayo in wixii shaqaale ah ee ku lug yeesha maamulka iyo baaritaannada loo samaynayo si waafaqsan siyaasaddaan ay qaataan tababar joogto ah oo munaasab ah si waajibaadkaa loogu caawiyo.

Shaqaalaha ayaa laga dalbayaa inay faallo ka bixiyaan siyaasaddaan ayna soo jeediyaan siyaabo lagu horumarin karo ayagoo la soo xiriiraya DO.